## Yaa U-qalma Dheefaha Shaqo La'aanta?

**Si aad ugu qalanto dheefaha shaqo la'aanta, waa inaad buuxisaa shuruudaha soo socda:**

- Waa inaad kasbatay mushaar kugu filan 18-kii bilood ee la soo dhaafay si aad ugu qalanto.
- Waa inaad u noqon shaqo la'aan khalad aadan lahayn.
- Waa inaad awood u leedahay inaad shaqayso oo aad shaqo diyaar u tahay.

**Ka hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dheefaha shaqo la'aanta, u-qalmitaanka, iyo tilmaamaha ka codsashada barta**

**dol.nebraska.gov/UIBenefits**



**Waa in aadan marnaba u oggolaanin inuu qof kale kuu gudbiyo sheegashada. Gudbinta sheegashadaada gaarka ah waxay gacan ka geysan doontaa dhawrista asturnaantaada waxayna hubin doontaa in Waaxda Shaqada ee Nebraska ay hayso macluumaad sax ah.**

## Onlaynka Ku Soo Gudbi Sheegashadaada Neworks. nebraska.gov

# NEworks

Sharaxaadda Barnaamijyada Dheefaha

Tilmaamaha Tallaabo-Ka-Tallaabada ah ee Sheegashada

Kheyraadka Dib-u-shaqaalaynta

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Macluumaadka Ku Saabsan Barnaamijyada Gaarka ah

Wax badan ka ogow barta
**dol.nebraska.gov**

NEBRASKA
Good Life. Great Connections.
DEPARTMENT OF LABOR

A proud partner of the
americanjobcenter®
network

Barnaamijka/Shaqo-bixiyaha Fursadaha Shaqo ee Loo Siman Yahay TDD: 800-833-7352

Qalabka iyo adeegyada naafada waa la heli karaa marka ay codsadaan shakhsiyaadka qaba naafonimada.

La cusbooneysiiyay: 5/29/2025



# Soo Gudbinta **Dheefaha Shaqo L'aanta** Waa La Fududeeyay

NEBRASKA
Good Life. Great Connections.
DEPARTMENT OF LABOR

A proud partner of the
americanjobcenter®
network

# Onlaynka ka gudbiso dheefaha shaqo la'aanta barta **NEworks.nebraska.gov**.

## Kahor Xaraynta Sheegashada

### Soo uruuri macluumaadkaaga gaarka ah

Waxaad u baahan doontaa inaad soo uruuriso macluumaadka iyo dokumeentiyada soo socda:

- Macluumaadka xidhiidhka (buuxi cinwaanka boostada guriga, lambarka telefoonka, iyo cinwaanka iimaylka)
- Lambarka Sugnaanta Bulshada
- Lambarka shatiga darawalnimo ama lambarka kaarka aqoonsiga ee Gobolka
- Akoonka bangiga iyo lambarka isweydaarka lacageed (haddii aad doorbidayso inaad ku hesho Dheefaha deebaaji toos ah)
- Haddii aadan muwaadin ahayn: Dokumeentiyada ay bixiyeen Adeegyada Muwaadinimada iyo Socdaalka Mareykanka (US Citizenship and Immigration Services)
- Haddii aad iskaa u shaqaysato, canshuur-celintaadii ugu dambaysay

### Diyaari sooyaalkaaga shaqo

Waxaan ku weydiin doonaa inaad bixiso macluumaad ku saabsan shaqadaadii ugu dambeysay:

- Magaca iyo macluumaadka xidhiidhka ee dhammaan shaqo-bixiyeyaashaada 18-kii bilood ee la soo dhaafay.
- Mushaarka aad ka heshay mid kasta oo ka mid ah shaqo-bixiyeyaashaas 18-kii bilood ee la soo dhaafay.
- Sababta aadan hadda u shaqaynin ama aadan ugu shaqaynayn shaqo-bixiyahaagii ugu dambeeyay.

## Sida iyo Goorta La Soo Gudbiyo

### Soo gudbi sheegashada isbuuca aad shaqo la'aanta noqoto

Waa inaad soo gudbisaa sheegashadaada isla marka aad shaqo la'aan noqoto. Ma qaadan kartid Dheefaha toddobaadyada ka horreeya inta aadan soo gudbin.

1. **Booqo NEworks.nebraska.gov** si aad u bilawdo.
2. **Si shakhsi ah isku diiwaangeli** si aad akoonkaaga u samaysato. Samayso Aqoonsiga isticmaalaha iyo fure-sireed.
3. **Qor soyaalkaaga shaqo** ee 18-kii bilood ee ugu dambeeyay.
4. **Dib-u-eeg waxyaabaha la isaga baahan yahay** ee sida dheefaha loogu sii qalmo.
5. **Samayso ama soo rar sooyaal xirfadeed** si aad u buuxiso shuruudaha lagaa rabo oo aad u sheegto shaqo-bixiyayaasha.

Wixii macluumaad dheeri ah, ka fiiri Buug gacmeedka Shaqaalaha Shaqo La'aanta ah **dol.nebraska.gov/UIBenefits**

## Waxa la Filan Karo Kadib Markaad Soo Gudbiso

### Waxaa laga yaabaa inaan u baahano ilaa 21 maalmood si aan dib ugu eegno sheegashada.

Waxaan xaqiijin doonaa macluumaadka ku saabsan sooyaalkaaga shaqo, mushaarkaaga, iyo sababta aadan hadda u shaqaynin. Marka aan go'aan ka gaarno sheegashadaada, waxaan kuu soo diri doonaa warqadda go'aanka. Haddii aadan ku waafaqsanayn go'aanka, racfaan ayaad soo gudbin kartaa.

### Hubi inaad akhrido dhammaan farriimaha an kuu soo dirno.

Waxaa laga yaabaa inaan kula soo xidhiidhno si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sheegashadaada. Ka hubi boostadaada, iimaylkaaga, fariimaha gaagaaban ee telefoonka, iyo Xarunta Farriimaha ee NEworks wixii wadaxidhiidh ah.

### Bilow inaad isla markiiba soo gudbiso sheegashooyinka toddobaadlaha ah.

Toddobaad kasta oo aad shaqo la'aan tahay, waa inaad soo gudbiso sheegasho toddobaadle ah si aad u hesho dheefaha. Ma heli kartid dheefaha haddii aadan soo gudbinin sheegasho toddobaadle ah.

### Lacag laguma siin doono toddobaadka sugitaanka.

Toddobaadka ugu horreeya kadib marka aad soo gudbiso sheegasho bilow ah waxaa loo yaqaanaa toddobaadka sugitaanka. Waa inaad soo gudbiso sheegasho toddobaadle ah toddobaadkani, balse ma heli doontid lacagaha dheefaha. Tani waxaa nooga baahan sharciga gobolka Nebraska.

### Samee shan hawl oo dib u helid shaqo toddobaad kasta.

Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara ka qaybgalka bandhig shaqo ama wicitaanka shaqo-bixiyayaasha. Ugu yaraan laba ka mid ah shanta hawlood waa inay ahaadaan codsiyo shaqo oo la jaanqaadaya waayo-aragnimadaadii iyo tababarkaagii hore.